

# Wajiga 1aad ee cusub ee Nicollet

Hindisaha B: Trellis



**FIIRO GAAR AH: SAWIRADA KU JIRA SOO HINDISAHA WAXA LOOGU TALAGALAY UJEEDDOOYIN TUSAALEYN OO KELIYA; MASHRUUCA UGU DAMBEEYA WUXUU U EKAAN KARAA MID KA DUWAN. TIROOYINKA KU JIRA HINDISAHAN AYAA LAGA YAABAA INAY ISBEDDELAAN MARKA NAQSHADEYNTA LA HUFO.**

For reasonable accommodations or alternative formats please call 311 at 612-673-3000. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab, hu 311. Hadii aad caawimaad u baahantahay, wac 311.



Waxaa laga yaabaa in muuqaalka dhismuhu u ekaado. Dhinaca dhismaha ee ku aadan halka laga dhisayo jardiinada mustaqbalka.

## Kooxda horumarinta

- Horjoogaha shaqaalaha iyo maamulaha/mulkiilaha guryaha dadku awoodo: [Trellis](#)
- Wadaagista lahaanshaha iyo maamulka guryaha dadku awoodo: [Dhismayaal Degaan Ah Ee Darajada 1aad](#) (diyaariyeen hay'ado ku takhasusay)
- Hay'adaha Goobaha Ganacsiga ee mulkiile/maamule: [Xarunta Horumarinta Xaafadaha](#) (NDC)
- Hay'ado aan faa'iido doon aheyn oo u adeega bulshada: [Naadiga Gabdhaha iyo Wiilasha \(Boys & Girls Club of the Twin Cities, BGCTC\)](#), [Hay'adaha Horumarinta Xaafadaha \(Neighborhood Development Center\)](#) (NDC), [iyo Hanti Ku Yeelo Minnesota \(Build Wealth MN\)](#)

- Laba goob ganacsi (2) ee geesaha dhismaha
- Meel gudaha ah oo loogu talagalay barnaamijyada guddiga beeraha nasashada iyo madadaalada ee [Minneapolis](#) (MPRB)
- Sadex (3) hay'adood aan faa'iido doon aheyn oo u adeega bulshada
- Gargaarka goobaha ganacsiga yaryar
- 215 goobood oo gaadiidka la dhigto (47 oogada sare ee dhulka, 168 dhulka hoose ee dhismaha)
- Goob lagu socdo oo isku xira goobaha
- Goob balaaran oo la fariisto oo iftiin qoraxeed badan leh
- Dhaliyayaasha ileyska cadceedda iyo tamarta
- Dhisma lix (6) dabaq ka kooban

## Qorshaha Mudada Dheer

EMashruucan ma isticmaalayo ama waxa uu isticmaalayaa wax yar oo gaas ah. Waxa ay dhismaha siineysaa korontada loo isticmaalo:


- Diirimaadka darbiyada dhismaha
- Nidaamka kuleylka ee biyaha iyo qaboojiyaha guriga
- Suxuunta cadceedda dabka ka dhaliya

## Hindisaha oo kooban

Mashruuca waxaa ka mid ah:

- 119 guri (apartment), dhamaantood waa la awoodi karaa
- 13 guro loo qoondeeyey dadka hoy la'aantu heyso
- 11 guro loo qoondeeyey dadka naafada ah

## Isticmaalka guud ee dhismaha & cabbirrada



## Bulsho ku adeegaysa goob aan faa'iido doon ahayn

[Boys & Girls Club ee Magaalooyinka](#) mataanaha waxa ay caruurta iyo dhalinyarada u fidiyaan barnaamijyo sanadka oo dhan. Waxa ay xafiiskooda u soo rarayaan goobta oo iyaga u gaar ah. Goobtooda waxa ay ka kooban tahay:

- Goob lagu qabto barnaamijyada Naadiga
- Qolalka barashada iyo daraasadda
- Qolalka caafimaadka iyo jimicsiga
- Goob tababarka shaqada iyo xirfadaha
- Ciyaarsiiska
- Xafiis
- Dabaqa labaad waxa ay u furan tahay dibadda oo kor ka soo eegaya goobta gaadiidka la dhigto.

[Build Wealth Minnesota](#) goob ayey ka kireysaneysaa dhismaha. Waxa ay

qoysaska iyo bulshada ka caawinayaan in ay xoogeystaan iyaga oo:

- Dadka baraya maareynta lacagta
- Tababar lagu bixiyo
- Ka heli karaan adeegyada iyo talo siinta maaliyadda

## Ganacsiyada tafaariiqda

Dukaanku waxa uu:

- Ku yaalaa geeska socodka dadku ku badan yahay
- Taageer ganacsatada yaryar ee degaanka
- Caawi in ganacsatada yaryar koraan [xarunta Horumarinta Dhismaha Xaafadaha](#) (NDC) ayaa leh oo maamuleysa dukaanka. Waxa ay ganacsiyada kale ku taageereysaa kiro jaban, tababar, shaqo ku tababarid, gargaar xagga farsamada ah, deyn, iyo adeega macaamiisha.



Naqshadda ayaa laga dheehan karaa dhismaha iyo goobaha la isaga gudbo dhismaha. Muuqaal laga sawiray dhinaca wadada Lake.


## Guriyeynta & la awoodi karo

	30% AMI*	50% AMI*	60% AMI*	WADAR
1 qol	17	-	12	29
2 qol	5	48	6	59
3 qol	2	7	11	20
4 qol	-	5	6	11
<b>WADAR</b>	<b>24</b>	<b>60</b>	<b>35</b>	<b>119</b>

\* Celceliska Dakhliga Aagga (AMI): heerka dawladda dhexe ee go'aaminta cidda u qalanta in ay ku noolaato guryo la awoodi karo. AMI waa barta dhexe ee qaybinta dakhliga gobolka. Tirooyinkani sannad walba way isbeddelaan. Kirada guryaha la awoodi karo waxay ku salaysan tahay Dakhliga Dhexdhexaadka ah ee aagga (AMI). Kirada % AMI hoose waxay ka dhigan tahay in gurigu uu awoodi karo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Daawo [muuqaal](#) si xog dheeri ah.

Simpson Housing ayaa u fidinaya adeegga 13 guri oo si gaar ah loogu qoondeeyey dadka hoy la'aanta ah.

Simpson Housing ayaa u fidinaya adeegga 13 guri oo si gaar ah loogu qoondeeyey dadka hoy la'aanta ah.



Naqshadda dabaqa koowaad